

# HORUMARINTA AMAANKA GAADIIDKA EE PHILIPS

Hagaajinta wadooyinka xaafadda Philips si looga dhigo mid amaan u ah dhamaan dadka isticmaala wadooyinka.



## Wareegga 2 ee Ka Qeybgalka Sahanka Kuleylaha 2022-2023

Kooxda Mashruuca Sahanka Gaadiidka waxa ay sameeyeen wareegga labaad ee ka qeyb gelinta kaasoo bilowday kuleylaha 2022 Dadaalkaas waa mid sii socday ilaa deyrta 2023.

Ujeedada laga leeyahay wareegga labaad waa in bulshada deganayaasha ah lala socodsiiyo horumarka uu mashruuca ku talaabsaday. Waxaanu xogtii ugu dambaysay u gudbinay:

- Goobta mashruuca laga hirgelinayo iyo waqtiga mashruuca.
- Xaafadaha kale ee la qorsheenayo in laga hirgeliyo mashruuca.
- Nooca horumarinta ah ee lagu talinayo.
- Faahfaahin ku saabsan naqshadda mashruuca

Wareegga ka qeyb gelinta waxa uu adeegsadaa hababka ugu wanaagsan ee lagula xiriiri karo ka qeyb galayaasha ee lagu ogaaday wareegga koowaad. Taas waxaa ka mid ah kulamada bulshade ee Open Streets iyo East Philips Carnival, ee ay ka qeyb qaataan ururada xaafadaha iyo kulmada gaarka ah ee loo qabto mashruuca.

Kulamada fool ka foolka ah ee ay qaban qaabiyaan shaqaalaha Waaxda Hawlaha Guud, iyo kulamada u gaarka ah Bulshada Philips Neighborhood sida cashada deganaayaasha Little Earth, kulamada u gaarka ah dadka ku hadla afka Isbaanishka ee Mercado Central, iyo kulmada dadka ka adeegta Village Market MII, iyo ganacsiyada ku wareegsan.



**Kulamada Bulshada**  
oo ay ka qeyb  
qaataan 6 kulan



**Kulamada Ururada**  
oo ay soo bandhigaan  
5 kulan



**Kulamada Bulshada**  
5 kulan oo ay soo  
qaban qaabiyeen

## Waxyaabaha Na Soo Gaaray

Kulan kasta oo ka qeyb gelin ah, xubnaha bulshada waxaa la siiyey fursad ay ra'yigooda ku dhiibtaan, codkooda ku soo bandhigaan oo ay weydiin karaan su'aalo la xiriira mashruuca. Halkan waxaan idinku-ugu soo gudbineynaa hal ku dhagyada ugu badan ee aan maqalno:



- Waxaanu dooneynaa in wadooyinka Philips noqdaan kuwo amaan ah.
- In la sugo amaanka dadka lugeynaya wadooyinka, kuwa saaran bushkuleetiyada, caruurta iyo dadka da'da ah.
- Wadidda gaadiidka ee si aan mas'uuliyad ku dhisnayn loo wado ee wadada 24aad iyo wadooyinka kale ee degaanka.
- Horumarinta muuqaalka wadooyinka oo si gaar ah loogu dadaalo beekhaaminta tamarta iyo dayactir wanaagsan.
- Cabashooyinka hawlgalka daryeelka ee nadaafadda wadooyinka iyo xaaqidda barafka.
- Cabashooyinka la xiriira goobaha gaadiidka la dhigto ee meelo gaar ah iyo isbedel la doonayo in lagu sameeyo.
- Su'aalaha ku saabsan sida qodobada mashruuca ay u hagaajin karaan xaaladda.

### Sharciga Qorshaha Gaadiidka

Mashruucan waxa uu waafqsan yahay Sharciga Qorshaha Gaadiidka, aragtida Magaalada ee Badbaadada, beekhaaminta tamarta, iyo wadooyin casri ah oo dadka oo dhan ka faa'iideystaan kuna gaaraan goobaha ay doonayaan.

### La soo xiriir

**Luke Hanson, Qorsheeye Sare ee Gaadiidka - Waaxda Hawlaha Guud**  
☎ 612-875-7237 ✉ Luke.Hanson@minneapolismn.gov

**Andrew Schmitz, Qorsheynta ee Gaadiidka - Waaxda Hawlaha Guud**  
☎ 612-875-2721 ✉ Andrew.Schmitz@minneapolismn.gov

### Si aad u hesho fududeynta suurogalka ah ama aad ku hesho habab kale:

Dadka dhagaha la'a ama maqalku ku adag yahay waxaa lagu xirayaa adeegga iyaga oo waca 311 ee 612-673-3000. Dadka isticmaala TTY ha soo wacaan 612-673-2157.

Para asistencia 612-673-2700 - Rau kev pab 612-673-2800 - Hadii aad Caawimaad u baahantahay 612-673-3500.